SOM

Komishinka Guud ee Qaxootiga
iyo Dadka Bilaa Dalka ah

Waxaa Lagu Siiyay SHarciga Badbaadada

Xaquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

Daabacaha

Buug-yarahan iyo dhamaan noocyadiisa luqadaha kala duwan waxaa laga heli karaa Bogga internetka ee CGVS:

www.cgrs.be/en/publications

Soo saaraha waa:

Office of the Commissioner General for Refugees and Stateless Persons (CGRS)
Rue Ernest Blerot, 39
1070 BRUSSELS

02 205 51 11

cgvs.info@ibz.fgov.be

www.cgrs.be

Dib loog fiiriyaya:
maarso 2026

Liiska waxyaabaha ku jira

Hordhac..... 5

1. Daganaanshaha Beljem 6

1.1 Sharciga joogitaanka 6

1.2 Ixtiraamka sharciga Belguim..... 7

1.3 Ka tanaasulidda ikhtiyaariga ah ee u celinta sharcikaaka badbaado 7

1.4 Joojinta ama ka la noqoshada sharcika badbaadada 8

1.4.1 Marka CGVS Sharciga badbaadada kaa joojiso 8

1.4.2 Marka ay CGVS sharcigaaga badbaado gaala noqodo . 9

1.5 Noqoshada Muwaadan Beljem ah 9

1.5.1 Caddeynda dhalasho..... 9

1.5.2 Qaadashada Jinsiyada..... 10

2. Dhukumentiyada Madaniga ah 11

3. Deganaanshaha xubnaha qoyska 11

3.1 Caruurta 11

3.2 Mideenda Qoyska 11

3.2.1 Dib u soo celinda xiriirrada xubnaha qoyska kala dhumay 13

3.3 U Safridda Dibadda..... 14

3.3.1 Joogitaan dheer oo dibadda ah iyo ku soo noqoshada Beljem 15

4. Shaqo 16

4.1 Shaqaale haysta heshiis/kontarakti shaqo 16

4.2 Baayacmushtar/Si madaxbanaan u shaqeeso..... 16

4.3 RAADINTA SHAQADA 17

5. Waxbarashada 18

5.1 Iskoolka Carruurta 18
5.1.1 Luqadda Waxbarashada 18
5.1.2 Kharashaadka Dugsiga 19
5.1.3 Iskoolka Xannaanada *(da'da 2.5 ilaa 5 sano)* 19
5.1.4 Waxbarashada Dugsiga Sare (da'da 12 ilaa 18 sano) 20
5.1.5 Waxbarashada Gaarka ah 21
5.1.6 Waxbarashada Sare 21
5.1.7 Sannadka diyaarinta 22
5.1.8 Kharashaadka 22
5.2 Aqoonsiga Shahaadooyinka 23
5.2.1 Aqoonsiga Shahaadadaada gudaha Vlaanderen 23
5.2.2 Sidee loo aqoonsadaa shahaadadaada? 23
5.2.3 Dukumentiyada 24
5.2.4 Kharashaadka 24
5.2.5 Aqoonsiga Shahaadadaada Wallonia ama Brussels... 25
6. Sugita Bulshada iyo Kaalmeenta Bulshada 26
6.1 Kaalmada Bulshada ee cayrta 26
6.2 Yaa xaq u leh kaalmada Cayrta? 26
7. Daryeelka Caafimaadka 27
7.1 Caymiska ama mutuwaalideedka Caafimaadka 27
7.2 Caafimaadka Carruurta 28
8. Hoyga 29
9. Isdhexgalka 32
9.1 Koorsada Isdhexgalka 32
9.2 Casharrada Luqadda 34
10. Xuquuqaha Gaarka ah ee Ajaanibta aan qaan gaarin, ee aan lala socon *(NBMV)* 35

Hordhac

Marwada sharafta leh, Mudanaha Sharafta,

Kominshanka Guud ee Qaxootiga iyo dadka bilaa wadanka ah (CGVS) ayaa ku siiyay sharciga badbaadada ee halka sanno ah (subsidiaire bescherming). Sharcigaaas oo ku heleysid xuquuqo badan. Sharcigan waxa kale oo la socda waajibaadyo. Waxaa hubaal ah in aad su'aalo ku saabsan mustaqbalkaaga aad qabto adigoo ah "qof laku ilaaliyo wadanka Belgium. Bogagga soo socta waxaad ka heli doontaa jawaabo. Waxa kale oo aad ka heli doontaa macluumaado badan oo aan rajaynayo inuu ka jawaabi doono su'aalahaaga. Haddii aad shaki qabto, ha ka labalabayn inaad la xiriirto adeegyada hoos lagu xusay.

Buugan kooban waxaad ka heli doontaa macluumaadyo aasaasi ah. Suurtagal ma ahan in dhammaan macluumaadyada jira oo dhan iyo kala duwanaanshaha lagu soo koobo buugan yar. Haddii aad la kulanto xadgudubyo ku saabsan ixtiraamka xuquuqahaaga iyo waajibaadyadaada, ha ka labalabayn inaad la xiriirto qareen,adeege sharci ama mid ka mid ah adeegyada ku xusan buugan.

Waxaad sidoo kale aad la xiriiri kartaa degmadaada, su'aalaha ku saabsan helitaanka jinsiyadda Belgium iyo dokumentika aqoonsiga, Xarunta Dadweynaha ee Daryeelka Bulshada oo loo yaqaan,Cayrta (OCMW) ee degmadaada, su'aalaha ku saabsan dhibaatooyinka bulshada (sida isdhexgalka, i.w.m) ama dakhli beddel u ah mushaharka(inta aad shaqo ka heleesid). Xarumaha Arrimaha Ajaanibta (Dienst Vreemdelingenzaken) waxa aad ka heli kartaa macluumaadyo ku saabsan fiisooyinka, oggolaanshaha deganaanshaha iyo isu keenista qoyska.

Xarunta Komishanka Guud ee Qaxootiga iyo Dadka aan Waddan Lahayn (CGVS) waxay sidoo kale guula diyaar yihiin in ay ka jawaabaan su'aalahaaga inta ay karaan.

Waxaan kuu rajaynayaa is-dhexgal wanaagsan oo ku aaddan bulshada Belgium.

Sophie Van Balberghe:
Guddoomiyaha Guud ee Komishanka Guud ee Qaxootiga iyo Dadka Aan Waddan Lahayn.

1. Daganaanshaha Beljem

1.1 Sharciga joogitaanka

Waxaad heshay go'aan ka yimid Kominshanka Guud ee Qaxootiga iyo Dadka aan waddan lahayn (CGVS) oo ku siiyay sharciga badbaadada (subsidiaire bescherming). Taas macnaheedu waa in aad si ku-meel-gaar ah ugu noolaan karto Belgium.

Go'aankaas la tag maamulka degmada aad degan tahay. Degmadu waxay kaa diiwaangelin doontaa diiwaanka ajaanibta *(vreemdelingenregister)*. Kadib waxaad heli doontaa dukumeenti aqoonsi: kaarka elektarooniga ah ee A (A-kaart). Kaarkani waa caddeyn muujinaysa inaad ka rajiskareesantahay deewaanka ajaanibta, si ku meelgaar ah.

Mudada shaqeynta kaarka A

- Kaarka A-ga wuxuu shaqaynayaa hal sano.
- Degmadu waxay kuu kordhin kartaa laba jeer, markiiba laba sano, iyada oo aan marka hore oggolaansho ka qaadan Xarunta Ajaanibta *(DVZ)*.
- Waa inaad codsiga kordhinta gudbisaa 30 ilaa 45 maalmood ka hor inta uusan kaarku dhicin, adigoo la xiriiraya degmada aad degan tahay.

Kaarka B *(Sharci abadi ah)*

Marka ay ka soo wareegto shan sano laga bilaabo maalintii aad codsatay magangelyada *(taariikhda ku qorneed annekiska ama sharciga 25 ama 26 loo karan ogyahay)*, waxaad heli kartaa caadiyan, oggolaansho joogitaan oo aan xad lahayn.

Si taas loo helo:

- Waa inaad ka codsataa degmadaada kaarka B (Sharci abadi ah).
- Bixinta kaarkan waxay u baahan tahay oggolaansho ka timid xarunta ajaanibta (DVZ).

Haddii kaarkaagu lumo ama la xado, Haddii kaarkaaga aqoonsiga uu kaa lumo ama la xado, waa inaad isla markiiba booliska u sheegtaa.

1.2 Ixtiraamka sharciga Belguim

Sharciga Beljem wuxuu khuseeyaa inta badan arrimaha noloshaada. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah dokumentiyadaadii dalkaagii hooyo sidooda ayey ahaanayaan (tusaale ahaan: qaangaarnimada ama shahaadada guurkaaka, kuwaas sidooda ayey ahaanayaan).

1.3 Ka tanaasulidda ikhtiyaariga ah ee u celinta sharcikaaka badbaado

Waxaad mar kasta dooran kartaa inaad iska celiso ama aad iska diido sharcikaaka badbaado. Laakiin waa inaad ogaataa in tani keeni karto in xarunta ajaanibtu (DVZ) ay joojinkarto xuquuqdaada joogitaanka ee dalkan.

Habraaca

Waa inaad si shaqsi ah ugu tagtaa:

Kominshanka Guud ee Qaxootiga iyo dadka bilaa dalka ah (CGVS) *(ballan ayaad u baahantahay)*

Ballanta waxaad ka samayn kartaa:

Email ahaan:
cgrefugees@ibz.fgov.be

Boosto:
CGVS - Helpdesk erkende vluchtelingen en staatlozen
Ernest Blerotstraat 39
1070 Brussel

Telefoon:
022055307
(maalmaha shaqada 9:00 – 12:00 iyo 13:00 – 16:00)

Halkaas:

- Waxaad isku qoraysaa sharcigaaga.
- Waxaad saxeexeesaa arji ama dhukumanti ah in aad iskaka celineeso sharcigaaga.

- Waxaana laku siinayaa cateentii aad sharciga iskaka celisay.

Kadib:

- Cateentaas waxaad la aadeysaa kumuunka magaalada aad dagantahay.
- Kumuunku, oo tixraacaya codsi ka yimid haayada ajaanibta, wuxuu kaa qaadi sharcigaaga ama kuuma cusbooneensiindoono.

1.4 Joojinta ama ka la noqoshada sharcika badbaadada

Haddii ay soo baxaan macluumaad cusub ama dhacdooyin cusub oo keeni kara in dib loo eego sharcikaaka badbaado, hay'adda CGVS ayaa baari doonta in sharcigaaga la joojiyo ama lagaala noqdo. Wasiirka ama qof uu wakiishay ayaa ka dalban kara CGVS in sharcigaaga dib loo baaro.

1.4.1 Marka CGVS Sharciga badbaadada kaa joojiso

Go'aanka joojintu wuxuu ka dhigan yahay in sharcigaaga la joojiyay ama lakuu cusboonin. Magangalyo danbe uma baahnid mar haddii xaaladihii sababay in la ku siiyo ay wax iska badaleen *(tusaale ahaan haddii xaaladda dalkaaka ay wax weyn ay iska badaleen ama xaaladu ay fiicnaatay).*

Waxaa laguugu yeeri karaa wareysi shaqsi ah si aad u sharaxdo sababta aad u malaynayso in aad weli u baahan tahay magangalyo. Waxa kale oo lagaa codsan karaa in aad qoraal ahaan ku bixiso sababahaas.

Haddii sharcigaaga la joojiyo:

- Waxaad racfaan u gudbin kartaa maxkamadda arrimaha ajaanibta *(Raad voor Vreemdelingenbetwistingen)*.
- Waxaa suurado gal ah in lagu amro in aad dalka ka baxdo.
- Haday dani dhacdo CGVS waxay guugu wici garaan interfiyuw. Inta lagu jiro wareysigan, waxaad sharxi doondaa dhammaan sababaha ay tahay in laguu dhaafo sharcigaaga badbaado. CGVS sidoo kale waxay kaa codsan kartaa inaad si qoraal ah ugu gudbiso sababaha aad u malaynayso in sharcigaaga luguu daayo oon lagaaga qaadin.
- Go'aanka lagu laalayo sharcigaaga badbaadada ah waxaa laga qaadan karaa racfaan leh awood buuxda oo loo gudbinayo RVV.

- Haddii la gaaro go'aan lagu laalayo sharcigaaga badbaadada, DVZ waxay ku siin kartaa amar ah inaad ka baxdo dalka, taas oo soo afjari karta xuquuqdaada deganaanshaha.

1.4.2 Marka ay CGVS sharcigaaga badbaado gaala noqodo

Sharciga waxaa lagaala noqon karaa haddii Kominshanka Guud ee Qaxootiga ay ogaato in aad markii horeba xaq u lahayn ama in laku siiyo ayna ahayn. Sida:

- Haddii aad ka mid tahay qof markii horeba xaqdaro laku siiyay sharciga.
- Haddii aad khatar ku tahay bulshada ama amniga qaranka.
- Haddii sharciga lakugu siiyay markii aad dhiibtay macluumaad been ah ama dukumenti been ah oo foojari ah.
- Haddii markaad sharciga heshay, dhaqankaaga dambe uu muujiyo in aadan khatar dhab ah ku jirin.
- Haddii aad dambi gashay oo aad dalkaaga uga baxday si aad uga baxsato ciqaabtaas; danbigu waa in uu ahaadaa danbi Beljamkaba ciqaab xabsi laku mutaysto.

Marka go'aanka kala noqoshada sharciga si miisaaman loo qiimeeyo, Kominshanka Guud ee Qaxootiga (CGVS) waxay ku siinayaan fursad aad isku difaacdo *(wareysi ama qoraal).* Waxaad mar walba xaq u leedahay in aad go'aankasta ka qaadato racfaan.

1.5 Noqoshada Muwaadan Beljem ah

Waxaa jira laba habraac oo muwaadan Beljam ah laku noqdo:

- **Caddeyn dhalasho (nationaliteitsverklaring)**
- **Qaadashada**

Markaad noqoto muwaadan Beljamays ah, waxaad luminaysaa sharcigaaga badbaado.

1.5.1 Caddeynda dhalasho

Shuruudaha lagu noqon karo muwaadin Belgian ah iyadoo la marayo "caddeynta dhalashada" (nationaliteitsverklaring) waa kuwo aad u badan oo faahfaahsan, sidaas darteed laguma wada dari karo buugan. Waxaad shuruudaha oo dhan ka heli kartaa bogga website-ka Federaalka, laamaha cadaalada (FOD Justitie).

https://justitie.belgium.be/nl/themas_en_dossiers/personen_en_gezinnen/nationaliteit/belg_worden/verklaring_tot_verkrijging

Waxaad u gudbinaysaa caddeynta dhalashada (nationaliteitsverklaring) shaqaalo degmada aad ku nooshahay u shaqeeya. Shaqaalahaas ayaa ku siin doona dhammaan faahfaahinta ku saabsan dukumentiyada aad u baahan tahay si aad u dhammaystirto faylkaaga.

Hay'adda CGVS kuma siin karaan shahaadada dhalashada. Sidaa darteed:

- La xiriir safaaradda dalkaaga.
- Haddii taas aysan suurtagal ahayn, la xiriir maxkamadda nabadda (vredegerecht) ee meesha aad degan tahay si laguu siiyo "akte van bekendheid" (caddeyn aqoonsi).

1.5.2 Qaadashada Jinsiyada

Shuruudaha

- Inaad tahay ugu yaraan 18 jir
- Inaad sharci ku joogto Belgium
- Inaad leedahay waxqabad gaar ah *(cilmi, sport ama bulsho)*
- In ay kugu adagtahay inaad ku hesho dhalashada hab kale, sida cadayn dhalashada.

Waxaad arrimahan ka la xiriirtaa diiwaan-hayaha (registrar) kamuunka degmada aad degan tahay.

CGVS ma bixin karto shahaadada dhalashada. La xiriir safaaradda waddankaaga ama, haddii taasi aysan suurtagal ahayn, maxkamadda degmada (magistrate's court) ee meesha aad degan tahay si aad u hesho shahaadada aqoonsiga (certificate of acknowledgment).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan "Jinsiyad qaadashada" (Naturalization) waxaa laga heli karaa bogga FPS Justice.

https://justitie.belgium.be/nl/themas_en_dossiers/personen_en_gezinnen/nationaliteit/belg_worden/naturalisatie

2. Dhukumentiyada Madaniga ah

Hay'adda CGVS ma bixiso dukumentiyada shaqsiyanka *(sida shahaadada dhalashada, shahaadada nikaaxa).* Qofka haysta sharciga badbaadada ama halka sano waa inuu la xiriirtaa safaaradda dalkiisa ama maxkamadda deegaanka.

Habraacyada qaargood *(sida shahaadada guurka, qaadashada dhalashada)* cadeen kasoo baxday nootaayo oo ah warqad sharci ah oo xaqiijinaysa aqoonsigaaga, ayaa kaa kaafin karta booskii warqada dhalashada, marka shahaadada dhalashada la waayo ama aan la heli karin.

---

3. Deganaanshaha xubnaha qoyska

3.1 Caruurta

- Carruurta kula socoday, sharcigaaga oo kale ayey qaadanayaan, waana inay ku qornaayeen warqadaadii anekiska ahayd ee lagu siiyay markii aad isdhiibtay.

- Carruurta ku dhalata Belgium waa in laga diiwaan geliyo xarunta degmada aad dagantahay. Shahaadada warqada dhalashada ayaad dhiibaysaa. Haddii aad rabto in la siiyo sharcigaaga badbaado, waa in lasoo dhiibaa si ay u helaan magan galyo caalami ah.

- Carruurta timid Belgium kadib marka laguu oggolaaday sharciga badbaado, waa inay iska diiwaan geliyaan **Xarunta Adeegga Ajaanibta (DVZ)**. Waa inaad adiga iyo ilmahaaga si wadajir ah u tagtaan xarunta **DVZ** *(furan Isniin ilaa Jimce, marka laga reebo maalmaha fasaxyada, cinwaankuna yahay Belliardstraat 68, 1000 Brussels, saacadda 08:30 subaxnimo)* si aad ugu gudbiso codsi ilaalin caalami ah adiga oo ku metelaya ilmahaaga. Waxaa muhiim ah inaad soo qaadato dhammaan dhukumentiyada la xiriira ilmahaaga iyo habraacaaga.

3.2 Mideenda Qoyska

Haddii aad tahay qof leh Sharciga badbaado (subsidiaire bescherming) ee Belgium, qaar ka mid ah xubnaha qoyskaaga dhow waxay heli karaan oggolaansho deganaansho iyagoo maraya nidaamka isu keenista qoyska (gezinshereniging).

Haddii xubnaha qoyskaasi aysan joogin Belgium, waxay ka codsan karaan fiiso isu keenis-qoys safaaradda ama qunsuliyadda Belgium ee dalka ay ku sugan yihiin. Haddii ay hore ugu sugan yihiin Belgium, waxay ka bilaabayaan habka midaynta qoyska degmada ay degan yihiin. Codsiga waxaa baara **xarunta adeega ajaanibta (DVZ)**.

Sharciyada cusub laga bilaabo 18 Agoosto 2025

Laga bilaabo 18 Agoosto 2025, waxaa dhaqan galaya sharciyo cusub oo ku saabsan isu keenista qoyska. Tani waxay saameyn ku yeelanaysaa cidda aad keeni karto Belgium haddii aad leedahay sharciga badbaado.

Waxaa laguu tixraacayaa sharciyadii hore haddii:

- Laguu aqoonsaday sharciga badbaado ka hor 18 Agoosto 2025
- Aad gudbiso codsigaaga ka hor 18 Agoosto 2025

Haddii lagu siiyay sharciga ka hor 18 Agoosto 2025

Dadka haysta sharciga badbaadada waxaa jira kala duwanaansho ku saabsan cidda aad Belgium keeni karto iyadoo loo marayo mideynta qoyska, taas oo ku xiran taariikhda go'aanka la qaatay.

Qofka qaangaar ah (+18)

- Xaaskaaga *(waa inaad is qabteen ka hor intaadan isdhiibin ama aad magangalyo dalban)*
- Carruurtaada *(ka yar 18 sano)*
- Carruurtaada qaangaar ah ee naafada ah

Haddii aad tahay ilmo aan waalid la socon (NBMV)

- Waalidiintaada
- Walaalahaaga yar-yar
- Walaalaha qaangaarka ah ee naafada ah *(haddii ay la socdaan waalidiinta)*

Haddii lagu siiyay sharciga badbaadada laga bilaabo 18 Agoosto 2025

Haddii aad tahay qof qaangaar ah (18+)

- Xaaskaaga *(waa inaad is qabteen ka hor intaadan isdhiibin ama aad magangalyo dalban)*
- Labadiinaba waa inaad ahaataan ugu yaraan 21 sano jir
- Carruurtaada kuwa 18 sano ka yar

- Carruurtaada qaangaarka ah ee naafada ah

Codsiga isu keenista qoyska waxaa la sameyn karaa kaliya 2 sano kadib marka laguu oggolaado sharciga, marka laga reebo haddii aad rabto oo keliya inaad keento carruurtaada yar-yar ama aan qaangaarin.

Haddii aad tahay ilmo aan waalid la socon

- Mar dambe xaq uma lihid isu keenista qoyska.

Xaaskaaga, lammaanahaaga diiwaangashan, carruurtaada ama carruurta lammaanahaaga waa inaysan khatar ku ahayn caafimaadka guud, nidaamka bulshada ama amniga qaranka, waana inay kula noolyihiin Belgium.

Sidoo kale, waa inaad buuxisaa shuruudo kale sida:

- Hoy ku filan
- Caymis caafimaad
- Dakhli ku filan, joogto ah oo laku noolan karo

Shuruudahani way kala duwan yihiin waxayna ku xiran yihiin cidda aad keenayso iyo goorta aad codsanayso. Waxaa laguula talinayaa inaad la xiriirto qareen si aad u bilowdo habka isu keenista qoyska.

3.2.1 Dib u soo celinda xiriirrada xubnaha qoyska kala dhumay

Adeegga **'Restoring Family Links'** ee Bisha Cas wuxuu kaa caawin karaa raadinta xubnaha qoyska ee aad kala dhundeen. Adeeggan waa lacag la'aan.

Sidoo kale, dadka haysta sharciga badbaadada Belgium waxay la xiriiri karaan Restoring Family Links si ay su'aalo uga weydiiyaan habraaca mideynta qoyska (gezinshereniging).

Rode Kruis-Vlaanderen Restoring Family Links
Motstraat 40
2800 Mechelen
Tel.: 015 44 35 22
E-mail: rfl@rodekruis.be
Website: www.rodekruis.be/wat-doen-we/hulp-wereldwijd/opsporen-van-vermiste-personen/

Croix-Rouge de Belgique - Service Rétablissement des Liens Familiaux

Boulevard Ernest Mélot 42
5000 Namur
Tel.: 081 77 16 48
E-mail: service.rlf@croix-rouge.be
Website: https://liens-familiaux.croix-rouge.be/

Adviescentrum Migratie (ACM) van het Centrum Algemeen Welzijnswerk (CAW)
Sint-Jacobsmarkt 39
2000 Antwerpen
Tel.: 03 235 34 05
E-mail: adviescentrum.migratie@cawantwerpen.be
Website: www.caw.be/locaties/adviescentrum-migratie-acm

3.3 U Safridda Dibadda

Safarku waa xuquuq aad leetahay, laakiin:

Haddii aad ku noqoto dalkaagii, waxaad halis u tahay inaad lumiso sharcigaaga. Markasta ood booqosho uku dagdid dalkaakii hooyo waa in aad la socodsiisaa komuunka dagmadaada, 5 sano ee hore, komuunkana waxuu la wadaagi doonaa haayada arimaha ajaanibta.

Markaad u safreyso dibadda, waa inaad mar walba sidataa:

- Kaarka ama lafta elektarooniga ah
- Baasaboorkaaga

Intaanad safarin ka hubso safaaradaha iyo qunsuliyadaha dalalka aad qorshaynayso inaad booqato shuruudaha fiisaha *(xitaa waddamada xubnaha ka ah Midowga Yurub).*

Haddii aadan haysan baasaboorka

Haddii aadan haysan baasaboorka ama aadan awoodin inaad hesho, waxaad dalban kartaa dukumenti safar oo gaar ah oo loogu talagalay ajaanibta, degmada aad ka diiwaangashan tahay ama dagantahay.

Dukumenti safar oo gaar ah ayaa lagu siin doonaa haddii:

- Aqoonsigaaga iyo jinsiyaddaada la xaqiijiyo
- Aad soo gudbiso shahaado caddeyneysa in aysan suurtagal ahayn inaad hesho baasaboorka dalkaaka ama dukumenti safar.

Waxaad shahaadadan ka codsan kartaa CGVS:

Email: CGRA-CGVS.Sub-Protection@ibz.be

Boosto:
CGRA
Ernest Blerotstraat 39
1070 Brussels

Shahaadadani waa inaysan ka weynaan 1 bil. CGVS waxay shahaadadan bixisaa oo keliya haddii maamulka waddankaaga hooyo ay si toos ah mas'uul uga yihiin khatarta ku soo gaari kara.

Sidaa darteed, CGVS ma bixiso warqadan haddii xaaladda guud ee amniga ee waddankaaga hooyo uu ku jiro, wali xaaladii sababtay in laku siiyo sharciga badbaadada *(subsidiaire beschermingsstatus).* Tani waxay dhacdaa haddii go'aanka lagu siiyay xaaladdan ilaalineed uu tixraacayo Qodobka 48/4, §2, c ee Sharciga Ajaanibta.

Dadka aan u baahnayn caddeynta baasaboorka

Shahaadada caddaynaysa in aanay suurtagal ahayn in la helo baasaboorka looma baahna haddii aad ka tirsan tahay mid ka mid ah qaybaha ajaanibta ee FOD Wasaarada Arrimaha Dibada (Foreign Affairs) ay u aqoonsan tahay inaysan heli karin baasaboor qaran ama dukumenti safar.

Dadka Tibetan-ka ah iyo dadka asal ahaan Falastiiniyiinta ah looma baahna inay soo gudbiyaan cadeymo ay ku cadeenayaan in aanay heli karin baasboor dalkooda.

Boggan ka fiiri su'aalaha: https://diplomatie.belgium.be/nl/voor-belgen-het-buitenland/het-belgisch-paspoort/reisdocument-voor-vluchtelingen-staatlozen.

3.3.1 Joogitaan dheer oo dibadda ah iyo ku soo noqoshada Beljem

Joogitaan dheer oo dibadda ah iyo ku soo noqoshada Belgium

Haddii aad ka maqnaado Belgium muddo aan ka badnayn 3 bilood, kuma saarna waajibaadyo gaar ah. Haddii aad haysato oggolaansho degenaansho oo sax ah waqtiga aad baxeyso, ma lumin doontid xuquuqdaada degenaansho.

Xitaa haddii sharcigaaga uu dhacayo inta aad maqantahay, ma lumin doontid xuquuqdaada degenaansho. Si looga fogaado dhibaatooyin, ka codso degmada cusboonaysiin inta aanad bixin.

Haddii aad qorshaynayso inaad maqnaato muddo dheer, waxaad xaq u leedahay inaad ku soo noqoto Belgium muddo 1 sano ah kadib bixitaankaaga.

Waa inaad buuxisaa shuruudahan

- Ka hor bixitaankaaga, ogeysii degmada inaad qorshaynayso inaad ka safrayso Belgium oo aad dib ugu soo laaban doonto.
- Haddii loo baahdo, codso in lafta laguu cusboonisiiyo si aad u haysato kaar ansax ah markaad soo noqoto.

Marka aad ku soo noqoto Belgium

Waa inaad iska diiwaangelisaa kumuunka dagmada muddo 15 maalmood gudaheed, adigoo u dhiibaya sharcigaaga oo ansax ah. Haddii aad shuruudahan buuxiso, kumuunka ayaa dib kuu diiwaan galinaya.

---

4. Shaqo

4.1 Shaqaale haysta heshiis/kontarakti shaqo

Uma baahnid oggolaansho si aad u shaqeyso shaqaale ahaan

4.2 Baayacmushtar/Si madaxbanaan u shaqeeso

Haddii aad iskaa u shaqeysado (sida ganacsi aad adiku leetahay,ergo ay shirkad soo dirsatay) waxaad u baahan kartaa rukhsad (beroepskaart). Inta aad ku jirto muddada degenaanshaha xaddidan (kaarka elektarooniga ah ee A), waa inaad

haysataa oggolaansho shaqo. Marka aad hesho xuquuq degenaansho aan xadidnayn (kaarka elektarooniga ah ee B), waa lagaa dhaafayaa shuruudda ah inaad haysato oggolaansho shaqo.

Qaybta Ruqsadaha/shatika Dhaqaalaha ee Adeegga Federaalka ee Dhaqaalaha (FOD Economie), ayaa bixisa "kaarka shatika." Waa inaad codsigaaga u gudbisaa maamulka degmada meesha aad degan tahay.

La xiriir xarunta dadweynaha daryeelka bulshada ee loo yaqaan cayrta/ocmw degmadaada, ama ururka shaqaalaha si aad uga ogaato xuquuqdaada iyo waajibaadyadaada ku saabsan xaaladdaada shaqo (tusaale ahaan: caymiska caafimaadka, gunnooyinka carruurta).

Sidoo kale waxaad cayrda kala tashan kartaa, suurtagalnimada helitaanka "dakhli, dadka aan shaqeen " (tusaale ahaan: lacagta shumaashka) hadii wili shaqo aad helin ama aad shaqeen.

4.3 RAADINTA SHAQADA

Iska diiwaangeli hay'adaha ama xafiisyada shaqooyinka laka raadsado.
Hay'adahan waxay kaa caawin doonaan:

- helitaanka shaqo ku habboon xirfadahaaga
- helitaanka tababar xirfadeed ama shaqo-barasho.
- qaadashada casharro Nederland ama Faransiis ah si ay kaaga caawiyaan shaqada
- diyaarinta CV-gaaga iyo warqadda codsiga shaqada ama u diyaar garowga wareysiga shaqada
- raadinta shaqooyin ku habboon khibraddaada ama shaqooyinka aad xiiseenaysid

Riijan kasta wuxuu leeyahay hay'ad shaqo oo u gaar ah

VDAB Vlaanderen

T 0800 30 700

https://www.vdab.be/contact

ACTIRIS Brussel

T 0800 35 123

https://www.actiris.brussels/nl/burgers/contact/

FOREM Wallonië

T 0800 93 947

https://www.leforem.be/contact/index.html

ARBEITSAMT Riijanka qaybta jarmalka

T 080 27 02 00

https://adg.be/desktopdefault.aspx/tabid-5407/

---

5. Waxbarashada

5.1 Iskoolka Carruurta

Ilmo kasta oo ku nool Belgium waxuu dhigankaraa iskool, iyadoon loo eegin jinsiyaddooda ama xaaladooda sharci. Belgium gudaheeda, dhammaan carruurta da'doodu u dhexayso 5 ilaa 18 sano waxaa ku waajib ah inay iskool dhigtaan.

Carruurta aan Beljan-ka ahayn ee da'doodu u dhexayso 3 ilaa 5 sano waxay bilaabi karaan iskool laga bilaabo maalintooda ugu horreysa ee Belgium yimaadaan. Carruurta da'doodu u dhexayso 5 ilaa 18 sano waa in laga qoraa iskool ugu dambayn 2 bilood kadib markay iska diiwaangaliyaan degmada ay ku nool yihiin.

5.1.1 Luqadda Waxbarashada

Luqadda waxbarashada waxay noqon kartaa:

- Nadarlaanka
- Faransiis
- Jarmal

Haddii carruurtu aysan aqoon ama ay aqoon yar u leeyihiin Nadarlaan ama Faransiis, waxay xaq u leeyihiin casharro gaar ah: fasallada soo dhaweynta ama "OKAN" *(fasallo loogu talagalay dadka aan afka ku hadlin).*

Gobolka aad degan tahay

- Vlaanderen: carruurtaadu waxay aadayaan iskool lagu baro Nadarlaanka
- Wallonia: carruurtaada waxaa wax lagu bari doonaa Faransiis

- Brussels: carruurtaadu waxay kala dooran karaan Nadarlaan ama Faransiis
- Gobollada Bariga: carruurtaada waxaa wax lagu bari doonaa Jarmal

5.1.2 Kharashaadka Dugsiga

Dhigashada dugsigu waa bilaash laga bilaabo xannaanada carruurta ilaa da'da 18 sano. Laakiin, waxaad bixin doontaa kharashyaadka dheeraadka ah sida:

- Cuntada
- Safarrada ilmaha loo wado

Haddii ay kugu adkaato bixinta kharashaadkan, waxaad codsan kartaa kaalmo ah kharashaadka iskoolka.

Heerarka Waxbarashada

Belgium gudaheeda, dugsiyada waxaa loo habeeyey iyadoo loo eegayo da'da.

5.1.3 Iskoolka Xannaanada *(da'da 2.5 ilaa 5 sano)*

Carruurta ka yar 5 sano khasab kuma aha inay dhigtaan dugsiga xannaanada. Carruurta intooda badan way dhigtaan sababtoo ah waa meel wanaagsan oo lagu barto luqadda. Waxay sidoo kale ku bartaan:

- Farshanka
- Sawiridda
- Sida loo wado ciyaaro

1-da bisha Sebtembar ee sannadka uu ilmahaagu gaaro 5 sano, waxaa waajib ku ah inuu aado iskoolka xannaanada.

Haddii ilmahaagu dhigto iskool Vlaanderen ku yaal ama af Nadarland wax lagu dhigo, oo uusan weli si fiican ugu hadlin af Nadarlaanka, marka uu gaaro 6 sano, iskoolka wuxuu go'aansan karaa inuu ilmahaagu hal sano oo dheeraad ah dhigto dugsiga xannaanada halkii uu ka bilaabi lahaa dugsiga hoose.

5.1.4 Dugsiga Hoose (da'da 6 ilaa 11 sano)

Waa inaad ilmahaaga ka qortaa iskoolka, haday tahay markii ugu horreysay oo uu iskoolkaas aadayo ama uu iskoolkii hore badalayo. Adika ayaa dooran kara iskoolka aad ilmahaaka ka qoraysid.

Dugsiga hoose wuxuu ka kooban yahay 6 fasal. Ilmahaagu waa inuu sannad kasta gaaraa yoolalka waxbarashada si uu ugu gudbo fasalka xiga.

Maadooyinka lagu barto

- Xisaab
- Akhris iyo qoraal
- Culuumta bulshada *(juqraafi, bayoolaji, taraafikada, iwm.)*
- Waxbarashada jir-dhiska *(oo ay ku jirto dabaasha)*.

5.1.4 Waxbarashada Dugsiga Sare (da'da 12 ilaa 18 sano)

Kadib dugsiga hoose, ilmahaagu wuxuu u gudbayaa dugsiga sare. Waa inaad mar kale diiwaangelisaa ilmahaaga sababtoo ah waxuu aadayaa iskool cusub. Waxaad dooran kartaa dugsiga sare ee uu ilmahaagu dhiganayo.

Waxbarashada dugsiga sare waxay ka kooban tahay 6 fasal. Dugsiga sare, ardayda waxaa loo diyaariyaa:

- Waxbarasho sare *(jaamacad)*
- Ama xirfad shaqo

Noocyada waxbarashada dugsiga sare

Waxbarashada guud ee dugsiga sare *(aso)*

Waxay ardayda u diyaarisaa waxbarasho sare.

Waxbarashada farshaxanka iyo Fanaanimada *(kso)*

Waxay dhalinyarada u diyaarisaa xirfado farshaxan iyo fanaanimo sida:

- Daansika
- Masraxa
- Sawirada
- Muusikada

Waxbarashada farsamada *(tso)*

Waxay dhalinyarada u diyaarisaa waxbarasho sare oo dhinaca farsamada ama dhaqaalaha ah ama xirfado farsamo sida:

- Koronto-yaqaan
- Nijaar

- Cunto kariye

Waxbarashada xirfadaha *(bso)*

Waxay dhalinyarada bartaa **xirfad shaqo** si ay shaqo u helaan.

5.1.5 Waxbarashada Gaarka ah

Carruurta qaarkood ma awoodaan inay dhigtaan dugsi caadi ah haddii:

- Ay leeyihiin caqabado waxbarasho
- Ay leeyihiin dhibaatooyin dhinaca dhaqanka ama hab-dhaqanka
- Ay naafo yihiin *(arag, dhaqdhaqaaq, maskaxeed ama maqal)*

Carruurtani waxay dhigan karaan **dugsi si fiican ugu habboon baahidooda**.

Si cunug looga diiwaangeliyo dugsiga waxbarashada gaarka ah, waxaa loo baahan yahay oggolaansho laga helo:

- **CLB** ee qaybta Vlaanderen
- **PMS** ee qaybta Wallonia

5.1.6 Waxbarashada Sare

Haddii aad heshay **shahaadada dugsiga sare**, waxaad sii wadan kartaa waxbarashadaada adigoo galaya kulliyad ama jaamacad. Hay'adaha waxbarashada sare waxay bixiyaan shahaadooyin ardayda u diyaariya suuqa shaqada, sida:

- Macallin
- Kalkaaliye caafimaad
- Xisaabiye
- Iyo xirfado kale

Shuruudaha Gelitaanka Waxbarashada Sare

Haddii shahaadada dugsiga sare Beljam ka qaadaday

Waxaad si toos ah isaga diiwaangelin kartaa kulliyadaha sare ama jaamacada.

Haddii aad haysato shahaado waddan kale laga bixiyey

- Waa inaad codsi gelitaan u gudbisaa dugsiga ka hor intaadan isdiiwaangelin

- Waa inaad caddeysaa inaad si fiican u taqaan luqadda waxbarashada *(Nadarlaanka, Faransiiska ama Ingiriis)*

Waxbarashada qaarkood

Waxbarashada:

- Dhaqtarnimo
- Dhaqtarka ilkaha
- Qaar ka mid ah injineernimada

waa inaad marka hore ka gudubtaa imtixaan.

Sannadka Diyaarinta ee Dadka Aan Afka wax laku dhigo aqoon

Qaar ka mid ah kulliyadaha ama jaamacadaha waxay bixiyaan sannad diyaarin ah oo loogu talagalay dadka aan luqadda ku hadlin.

5.1.7 Sannadka diyaarinta

Waxaa sanadkan lagu baraa ardayda :

- Nadarlaan/Faransiis loogu talagalay dadka aan luqadda ku hadlin
- Qaabka wax loo barto
- Qaab ku saabsan doorashada barnaamijka aad baranayso
- Ingiriis, xisaab iyo cilmi-baaris
- Iyo casharro kale oo aad dooran karto

5.1.8 Kharashaadka

Haddii aad tahay qof leh sharciga badbaadada (subsidiaire beschermingsstatus):

- Waxaad codsan kartaa deeq waxbarasho si ay uga caawiso bixinta qayb ka mid ah lacagta waxbarashada
- Waxa kale oo aad bixinaysaa lacag waxbarasho oo ka yar tan ardayda kale

Haddii aad tahay qof haysta sharciga badbaadada oo aad ka yar tahay 25 sano, waxaad codsan kartaa lacagta carruurta (child benefit). Tani waa lacag yar oo la siiyo dhammaan dhalinyarada inta ay waxbaranayaan.

Noocyada Waxbarashada Sare

HBO5

Waa barnaamijyo gaagaaban oo ku wajahan dhinaca shaqo ku tababarka iyo ku dhaqanka.

Shahaadada bachelor-ka xirfadeed

Waa barnaamij ku wajahan dhinaca shaqada oo soconaya 2 ilaa 3 sano.

Shahaadada bachelor-ka tacliimeed iyo master-ka

Waa barnaamijyo qofka u oggolaanaya inuu suuqa shaqada bilaabo kaliya marka uu dhammeeyo shahaadada master-ka. Barnaamijyadani waxaa ku yar cilmika farsamada gacanta, waxayna u badan yihiin aqoon cilmiyeed.

Doctorate *(PhD)*

Waa barnaamij takhasus sare leh oo la qaato kadib shahaadada master-ka. Cilmi-baarista sayniska ayaa ah hawsha ugu weyn.

5.2 Aqoonsiga Shahaadooyinka

5.2.1 Aqoonsiga Shahaadadaada gudaha Vlaanderen

Ma haysataa shahaado ajnabi ah? NARIC Vlaanderen waxay aqoonsataa shahaadooyinka ajnabiga ah ee dadka doonaya inay ka shaqeeyaan ama wax ku bartaan Vlaanderen.

Haddii aad rabto inaad waxbarashadaada ka sii wadato Vlaanderen ama Brussels, si toos ah ula xiriir jaamacadda ama kulliyadda.

5.2.2 Sidee loo aqoonsadaa shahaadadaada?

Waxaad kala dooran kartaa laba hab/qaab oo kala duwan.

1. Aqoonsiga Heerka/Darajada *(Level recognition)*

NARIC waxay go'aamisaa heerka/darajada ay shahaadadaada ajnabiga ahi gaarsiisan tahay.

Tani waxaa loo isticmaalaa:

- In lagu ogaado heerka waxbarasho ee Vlaanderen ee shahaadadaadu u dhiganto *(dugsiga sare, bachelor ama master)*
- Si aad u codsato shaqo gaar ah
- Marka aanu jirin barnaamij waxbarasho oo u dhigma shahaadadaada
- Haddii aadan haysan manhajkii waxbarashadaada

2. Aqoonsiga Gaarka ah *(Specific recognition)*

NARIC waxay go'aamisaa shahaadada gaarka ah ee Vlaanderen ah ee shahaadadaada ajnabiga ahi u dhiganto.

Tani waxaa loo baahan yahay:

- Haddii aad rabto inaad ku shaqeyso xirfad sharci ahaan nidaamsan sida dhakhtar, kalkaaliye, naqshadeeye ama xisaabiye
- Haddii aad rabto inaad isticmaasho magac xirfadeed la ilaaliyo sida injineer, dhakhtar, farmashiiste, umuliso ama shaqaale bulsho
- Haddii xirfad gaar ah ay u baahan tahay aqoonsi shahaado gaar ah
- Haddii aad codsanayso aqoonsiga doctorate-ka.

5.2.3 Dukumentiyada

Dukumentiyada aad u baahan tahay inaad u gudbiso NARIC waxay ku xiran yihiin habka aad dooratay. Aqoonsiga daqasuska ah wuxuu u baahan yahay dukumentiyo ka badan aqoonsiga darajada/heerka shahaadada .

Haddii dukumentiyadaadu aysan ku qornayn Nadarlaan, Faransiis, Ingiriis, ama Jarmal, waa inaad soo turjumdaa.

5.2.4 Kharashaadka

Codsiga aqoonsiga shahaadadu waa u bilaash dadka:

- Codsaday magangalyo
- Ah qaxooti la aqoonsaday ama leh sharciga badbaadada
- Soo gala daqli yar, oo ay ku caddeyn karaan warqad ka timid caymiska caafimaadka/mutuwaalideedka
- Qaada dakhlika cayrta ama kaalmo bulsho oo u dhiganta
- leh heshiis isdhexgal oo aan ka badneen saddex sano
- ah shaqo-doon oo ay soo gudbiyeen VDAB ama ACTIRIS

Cinwaanka NARIC

NARIC Vlaanderen
Conscience Building
Avenue du Roi Albert II 15, 1210 Saint-Josse-ten-Noode
T 1700
https://www.vlaanderen.be/ahovoks/dienstverlening/naric-vlaanderen

5.2.5 Aqoonsiga Shahaadadaada Wallonia ama Brussels

Haddii aad shahaado ku qaadatay waddan kale oo aad rabto inaad ka shaqeyso Wallonia ama Brussels, waxaad codsan kartaa aqoonsiga shahaadadaada.

Waa inaad u gudbisaa codsi Wallonia-Brussels Federation si aad u hesho "aqoonsi u-dhigma aqoonsigaaga" (equivalency recognition).

Aqoonsigan waa dukumenti kuu oggolaanaya inaad ku caddeyso darajada/heerka shahaadadaada ajnabiga ah ee Beljum.

Waxaad kala dooran kartaa laba hab/qaab:

- Aqoonsiga Heerka/Darajada (Level recognition): waxaa lagu go'aamiyaa heerka waxbarasho ee Belgium ee shahaadadaadu u dhiganto (bachelor, master, ama heer kale).
- Aqoonsiga Gaarka ah (Specific recognition): waxaa lagu go'aamiyaa haddii waxbarashada aad dibadda ku qaadatay ay qiimo la mid ah leedahay waxbarashada Beljam.

Codsiga aqoonsiga heerka wuxuu ku kacayaa inta u dhexeysa 150 ilaa 200 euro. Dadka haysta sharciga qaxoodika ama sharciga badbaadada lakama rabo inay lacagtaas bixiyaan.

Ka hor intaadan bilaabin nidaamka, waxaa fiican inaad la xiriirto Wallonia-Brussels Federation:

(http://www.equivalences.cfwb.be/).

Nidaamku wuxuu noqon karaa mid adag. Waxaad sidoo kale caawimaad ka heli kartaa xarumaha isdhexgalka gobolka ee Wallonia ama ururka CIRÉ ee Brussels.

CIRÉ (Coordination et Initiatives pour Réfugiés et Étrangers)

Visvijverstraat 80/82
1050 Brussels
T 02 629 77 10
Email: cire@cire.be

CIRÉ

Liiska xarumaha isdhexgalka riijanka Wallonia waxaad ka heli kartaa:

---

6. Sugita Bulshada iyo Kaalmeenta Bulshada

6.1 Kaalmada Bulshada ee cayrta

Haddii lagu siiyay sharciga badbaadada (subsidiaire bescherming) oo aadan weli haysan dakhli aad guri ku kireysato iyo kharashaadka nolosha ku daboolato, waxaad codsan kartaa kaalmo ka timaadda cayrta (OCMW**)**.

6.2 Yaa xaq u leh kaalmada Cayrta?

Si aad u hesho kaalmo cayrta, waa inaad buuxisaa shuruudo gaar ah:

- Waxaad si sharci ah ugu nooshahay Belgium *(qaxooti la aqoonsaday, sharciga badbaadada, iwm.)*
- Ma haysadid ilo dhaqaale oo kugu filan
- OCMW waxay qiimeyn doontaa xaaladdaada iyo dakhligaaga
- Waxaad dagantahay guri Belgium ku yaal

Shuruudo kale oo OCMW soo rogi karto

- Diyaar u ahaanshaha shaqo
- In marka hore la hubsado in aad cid kale xuquuq ku leetahay

Waa maxay kaalmada ay bixiso OCMW *(cayrta)?*

OCMW waxay qiimeysaa kaalmada kuugu habboon.

Tusaalooyinka kaalmada

- Kaalmo dhaqaale *(dakhli aasaasi ah oo bille ah ama gunno dheeraad ah haddii dakhligaagu ka hooseeyo heerka dakhliga aasaasiga ah)*
- Guri ama caawimaad raadinta guri
- Gunno dejin ah *(caawimaad lagu iibsado alaabta guriga iyo qalabka guriga)*
- Caawimaad bixinta kharashaadka caafimaadka
- Caawimaad helitaanka shaqo
- Caawimaad bixinta deymaha *(dhexdhexaadinta deymaha)*
- Kaalmo nafsi iyo bulsho

Haddii aad u baahan tahay kaalmo bulsho, tag cayrta degmada aad ku nooshahay.

---

7. Daryeelka Caafimaadka

7.1 Caymiska ama mutuwaalideedka Caafimaadka

Caymiska Caafimaadka

Waxaa qof kasta oo Belgium dagan ku waajib ah in uu lahaado caymis caafimaad. Haddii aad xanuunsato, sanduuqa caymiska caafimaadku wuxuu daboolayaa qayb weyn oo ka mid ah kharashaadkaaga caafimaad.

Haddii aadan shaqayn karin cudur ama shil awgiis, waxaad heli doontaa dhaqaale kuu beddelaya mushaharkaaga.

Adigoo ah qof leh sharciga badbaadada (subsidiaire bescherming), waa inaad iska diiwaangelisaa sanduuq caymis caafimaad oo la aqoonsan yahay oo aad doorato.

Haddii aadan rabin inaad ku biirto sanduuq caymis caafimaad, waxaad si bilaash ah isaga diiwaangelin kartaa:

"Hulpkas voor Ziekte- en Invaliditeitsverzekering"
(Sanduuqa Kaalmada ee Caymiska Cudurka iyo Naafanimada).

Maxay kuu qabanaysaa sanduuqa caymiska caafimaadka?

Sanduuqa caymiska caafimaadka *(ama mutuwaalideedka)*:

- Wuxuu daboolaa kharashaadka daryeelka caafimaadka
- Wuxuu bixiyaa gunno dhaqaale haddii aadan shaqayn karin cudur ama shil awgiis
- Wuxuu bixiyaa gunno dhaqaale inta lagu jiro fasaxa dhalmada
- Wuxuu abaabulaa adeegyada daryeelka guriga *(caawimaadda carruurta iyo dadka waayeelka ah)*
- Wuxuu amaahiyaa qalabka caafimaadka ee loogu talagalay daryeelka dadka buka ee guriga jooga

Immisa ayuu ku kacayaa caymiska caafimaadku?

Markaad isdiiwaangeliso, waa inaad bixisaa lacag sanadle ah oo go'an *(inta u dhexeysa 80 iyo 110 euro).*

Caymiska caafimaadku waa bilaash carruurta ama dadka kale ee kugu tiirsan.

Imisa sanduuq caymis caafimaad ayaa jira?

- Sanduuqa Caymiska Caafimaadka ee kiristelik
- Sanduuqa Caymiska Caafimaadka ee Liberal-ka
- Sanduuqa Caymiska Caafimaadka ee Soshiyaalka-ka
- Sanduuqa Caymiska Caafimaadka ee Madaxbannaan
- Sanduuqa Caymiska Caafimaadka ee Dhexdhexaadka ah

Bogga RIZIV waxaad ka heli kartaa liiska dhammaan sanduuqyada caymiska caafimaadka:

https://www.riziv.fgov.be/nl/professionals/andere-professionals/ziekenfondsen/contacteer-de-ziekenfondsen

7.2 Caafimaadka Carruurta

Caafimaadka ilmahaaga yar ama dhallaankaaga

Belgium waxay bixisaa adeeg bilaash ah oo lagu kormeero caafimaadka dhammaan carruurta ka yar 3 sano. Waxa kale oo aad waydiin kartaa su'aalo ku saabsan:

- Dhalmada
- Koritaanka
- Barbaarinta ilmahaaga

Waxaad ilmahaaga *(0 bilood ilaa 3 sano jir)* u geyn kartaa baaritaan caafimaad oo bilaash ah:

- Kind & Gezin *(Flanders iyo Brussels)*
- ONE *(Wallonia iyo Brussels)*

Xarumahan caafimaad waxay sidoo kale taageero siiyaan haweenka uurka leh.

Kind & Gezin
T: 078 150 100
https://www.kindengezin.be/nl/contact

ONE
T: 02 542 12 11
https://www.one.be/public/contact/

Maxay qabtaan xarumahan?

- Waxay cabbiraan dhererka iyo miisaanka ilmahaaga
- Dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad ayaa baaraya ilmahaaga
- Toddobaadyada ugu horreeya dhalashada kadib, kalkaaliyeyaashu waxay hubiyaan in ilmahaagu si fiican wax u maqlo
- Inta u dhaxaysa 12 ilaa 24 bilood, waxay hubinayaan aragga ilmahaaga
- Ilmahaagu wuxuu heli doonaa tallaallada lagama maarmaanka ah
- Waxaad waydiin kartaa su'aalo ku saabsan nafaqaynta, barbaarinta, badbaadada iyo caafimaadka

Haddii uu xanuunsado ilmahaaga

Haddii ilmahaagu xanuunsado, waa inaad u gaysaa dhakhtarka qoyska (family doctor), hana u geyn xarumaha kor ku xusan ee waaxda caafimaadka.

---

8. Hoyga

Raadinta guri

Kadib marka lagu siiyo sharciga badbaadada ah (subsidiaire beschermingsstatus), waxaad haysataa 2 bilood si aad u hesho guri kuu gaar ah. Mudadaas kadib, waa inaad ka baxdaa xerada aad dagantahay ama guriga OCMW (cayrta) aad dagantahay.

Haddii aadan weli helin guri 2 bilood ka bacdi

Haddii aadan weli helin meel aad degto kadib 2 bilood, Fedasil waxay kordhin kartaa muddadaas ilaa ugu badnaan 4 bilood.

Diyaari dukumentiyadaada

Ka hor intaadan bilaabin raadinta guri, hubi in dhammaan dukumentiyadaadu diyaar yihiin:

- Kaarka aqoonsiga elektarooniga ah (A-kaart)
- Akoon bangi iyo kaarka bankika
- Caymis caafimaad

Waxaad u baahan doontaa dukumentiyadan si aad u saxiixdo heshiiska kontraktika guriga.

Immisa kirada ku bixin kartaa?

Isticmaal qiyaastii 1/3 dakhligaaga si aad guri u kiraysato.

Hubi inaadan ku bixin wax ka badan kalabar dakhligaaga kirada!

Helitaanka guri

Waxaad guri ka raadin kartaa:

Suuqa gaarka loo leeyahay *(private market)*

Adigoo adeegsanaya:

- Wakaalad guryaha (real estate agency)
- Saaxiibo
- Dad aad taqaan

- Mutadawiciin kaa caawinaya raadinta

Xarumaha gireenta guryaha soshiyaalka ah *(social housing market)*

Hay'adda Kiraynta Guryaha Soshiyaalka (SVK) ama Shirkadda Guryaha Bulshada (SHM) waxay bixiyaan guryo loogu talagalay dadka u baahan hoy.

Si aad u kiraysato guri soshiyaal ah:

- Waa inaad codsi u gudbisaa hay'adda guryaha
- Haddii aad buuxiso shuruudaha la xiriira degenaanshaha, da'da, awoodda dhaqaale, dakhliga iyo lahaanshaha hanti, hay'adda guryaha soshiyaalka ah waxay kaa diiwaangelin doontaa liiska codsadayaasha.

Inta lagu jiro booqashada guriga

Markaad booqanayso guri aad rabto in aad gireesato, hubi:

- Gurigu ma ku jiraa xaalad wanaagsan?
- Gurigan ma ku filan yahay qoyskaaga?
- Ma jiraan raadad biyo daadasho ama qoyaan?
- Ma leeyahay tuunbooyin biyo, kuleyliye, shofaash iyo koronto?
- Gurigu ma yahay meel ammaan u ah qoyskaaga?

Mulkiilaha guriga iyo kiraystaha

Mulkiilaha guriga iyo adiga *(kiraystaha)* waa inaad si wadajir ah u saxiixdaan heshiiska kirada guriga.

Mulkiilaha gurigu wuxuu sidoo kale kaa codsan doonaa deebaaji, oo hal mar la bixiyo.

Deebaajiku wuxuu u dhaxaysaa 1 ilaa 3 bilood oo kirada guriga ah.

Waxaad ka codsan kartaa OCMW inay kaa bixiso lacagta deebaajika, laakiin waa inaad lacagtaas dib ugu celisaa.

Website-yada laga raadsado guryaha

- Immoweb

- Zimmo
- Immovlan
- Realo
- Immoscoop
- 2dehands

---

9. Isdhexgalka

9.1 Koorsada Isdhexgalka

Fasallada Isdhexgalka

Ma doonaysaa inaad Belgium ku dareento sidii gurigaaga oo kale oo aad dalka si fiican u barato?

Qaado casharro ku saabsan bulshada iyo luqadda dalka aad ku nooshahay. Haddii aad Belgium ku cusub tahay ama aad muddo joogtay, waxaad iska diiwaangelin kartaa barnaamijka isdhexgalka adiga oo adeegsanaya luqaddaada ama luqad aad fahanto.

Yaa loogu talagalay?

- Dhammaan dadka ajaanibta ah ee si sharci ah ugu nool Belgium
- Qaxootiga la aqoonsaday
- Dadka haysta sharciga badbaadada ah *(subsidiaire beschermingsstatus)*

Maxaad baran doontaa?

Barnaamijka isdhexgalku wuxuu ka kooban yahay:

- Koorsada nolosha Belgium *(shaqo, guri, waxbarasho, xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga)*
- Hagid ku saabsan helitaanka shaqo ama tababar

- Macluumaad ku saabsan isboortiga, dhaqanka iyo waqtiyada aad firaaqada tahay

Iska diiwaangeli fasallada isdhexgalka ee gobolkaaga

Isdhexgalka Vlaanderen

Hay'adda Isdhexgalka iyo la qabsiga bulshada

https://www.integratie-inburgering.be/nl/contact/contactpunten

Isdhexgalka Wallonia

Xarumaha gobolka ee isdhexgalka

https://actionsociale.wallonie.be/home/thematiques/integration-des-personnes-d-origines-etrangeres/centre-regional-d-integration.html

Isdhexgalka Brussels

BeWelcome Brussels

https://bewelcome.brussels

Isdhexgalka Antwerpen

Atlas Antwerpen

https://www.atlas-antwerpen.be/nl

Isdhexgalka Gent

Amal Gent

https://www.amal.gent/

Isdhexgalka Bulshada ku hadasha Jarmalka

Integrationsparcours

https://info-integration.be/integrationsparcours/

Dadka heysta sharciga badbaadada ah (subsidiaire beschermingsstatus) waxay sidoo kale la xiriiri karaan Caritas International si ay uga helaan caawimaad ku saabsan habraacyada maamulka iyo geeddi-socodka isdhexgalkooda.

Caritas International

Liefdadidgheidstraat 43

1210 Brussels

T 02 229 36 11

https://www.caritasinternational.be/nl/contact/

9.2 Casharrada Luqadda

Si aad uga shaqeyso, wax uga barato, oo ula xiriirto dadka Belgium, waxaad u baahan tahay inaad barato luqadda. Belgium gudaheeda, waxaad qaadan kartaa koorso Nadarlaan ama Faransiis ah oo loogu talagalay dadka aan afkan u dhalan.

Belgium gudaheeda, dadka waxay ku hadlaan:

- Nadarlaan
- Faransiis

iyadoo ku xiran meesha ay ku nool yihiin. Qayb yar oo dalka ka mid ah *(gobolka Liège)* dadka waxay ku hadlaan Jarmal.

Dhammaan carruurta ka yar 18 sano jir waxay iskuulka ku bartaan Nadarlaan, Faransiis ama Jarmal. Dadka waaweynna waxay iska diiwaangelin karaan koorso luqadeed.

Casharrada luqadda Nadarlaanka

Vlaanderen

Waxaad iska diiwaangelin kartaa koorso luqadda Nadarlaanka ee Vlaanderen adigoo maraya:

Hay'adda Isdhexgalka & La Qabsiga Bulshada *(Agency for Integration & Civic Integration)*
https://integratie-inburgering.be/nederlands-leren

Brussels

Waxaad iska diiwaangelin kartaa casharrada luqadda Nadarlaanka ee Brussels adigoo maraya: Het Huis van het Nederlands
https://www.huisnederlandsbrussel.be/info/leren/cursus

Casharrada luqadda Faransiiska

Brussels ama Wallonia

Waxaad iska diiwaangelin kartaa casharrada luqadda Faransiiska adigoo maraya:

- CIRÉ : https://www.cire.be/nos-activites/ecole-de-francais/
- Bruxelles Formation : https://www.bruxellesformation.brussels/nous-contacter/

Wallonia

Casharrada luqadda Faransiiska ee Wallonia, fadlan la xiriir:

xarumaha gobolka ee isdhexgalka :
https://actionsociale.wallonie.be/home/thematiques/integration-des-personnes-d-origines-etrangeres/centre-regional-d-integration.html

---

10. Xuquuqaha Gaarka ah ee Ajaanibta aan qaan gaarin, ee aan lala socon *(NBMV)*

Marka ilmo ajnabi ah oo aan waalid la socon la siiyo sharciga badbaadada ah (subsidiaire beschermingsstatus), mas'uuliyadda daryeelka way sii socotaa ilaa ilmuhu gaaro da'da 18 sano.

Sida uu dhigayo Sharciga Mas'uuliyadda Daryeelka, qofka yar ee ajnabiga ah ee aan waalid la socon wuxuu luminayaa masuulkiisa marka uu gaaro da'da qaangaarnimada, waxaana dhammaanaya waajibaadka masuulkiisii. Sidaas darteed, masuulku mar dambe kama masuul aha arrimahiisa sharci iyo maamulka.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa marar badan dhacda in masuulka iyo dhalinyaradu sii wada xiriiraan, masuulkuna sii wado taageeridda dhalinyarada.

Haddii uu jiro khilaaf
Haddii uu jiro khilaaf adiga iyo masuulkaaga dhex mara, fadlan marka hore la xiriir:
Adeegga Mas'uuliyadda Daryeelka.
Haddii uu jiro khilaaf culus, garsooraha nabadda (justice of the peace) ayaa faragelin doona.

Garsooraha nabadda wuxuu xilka ka qaadi karaa masuulka keliya haddii:

- Uu ku guuldareysto inuu gutto waajibaadkiisa
- Ay jiraan khilaafaad culus oo u dhexeeya ilmaha yar iyo masuulka

Dib-u-mideynta qoyska

Waalidiinta ilmaha ajnabiga ah ee aan waalid la socon *(NBMV)* waxay dib ula midoobi karaan ilmahooda marka ay keenaan caddeyn muujinaysa xiriirka qaraabonimo ee waalidiinta. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka waxaad ka heli kartaa cutubka 3.2. Dib-u-mideynta qoyska (Gezinshereniging).

Kaalmo bulsho iyo dhaqaale

NBMV-ga haysta sharciga badbaadada (subsidiair beschermde) wuxuu xaq u leeyahay caawimaad bulsho oo dhaqaale. Wixii arrintan ku saabsan, ka warayso OCMW-ga meesha aad degan tahay.

Deganaansho la hagayo *(begeleid wonen)*

Markaad haysado sharci badbaado (subsidiair beschermde) oo aad ka weyn tahay 16 sano, waxaad codsan kartaa deganaansho la hagayo (begeleid wonen).

Haddii aad gaarto 18 sano, oo aad haysato oggolaansho degenaansho (verblijfsvergunning), kaligaa ayaad noolaankartaa.

Kala tasho arrimahan:

- Masuulkaagii *(hore)*
- Iyo/ama hagahaaga

Adeegga Mas'uuliyadda Daryeelka

Wasaaradda Federaalka ee Caddaaladda (FOD JUSTITIE)
Adeegga Mas'uuliyadda Daryeelka

Waterloolaan 115
1000 Brussel
T: 078 15 43 24
E-mail: voogdij@just.fgov.be
https://justitie.belgium.be/nl/dienstvoogdij

Office of the Commissioner General for Refugees and Stateless Persons (CGRS)

www.cgvs.be

www.asyluminbelgium.be

Rue Ernest Blerot, 39
1070 BRUSSELS
Belgium